



## XAQIIQOYINKA KOOBAN EE

# Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee Carruurta

**Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad oo qiimo jaban.**

**NY State of Health ayaa ah Suuqa rasmiga ah ee Caymiska caafimaadka York.**

## Maanta Isqor.



Booqo barta onlaynka ah ee [nystateofhealth.ny.gov](https://nystateofhealth.ny.gov)



Wac taleefanka  
1-855-355-5777  
TTY  
1-800-662-1220



Toos ugu tag Assistor adoo kala xariiraaya  
[info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor](https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor)

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabiqi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

**Dhoola cadaynta cunugaagu waxay iftiiminaysaa maalintaada. Inaad hadda daryeesho waxay keenaysaa mustaqbal caafimaad qaba.**

**Laakiin waxaa jira waxyaabo ay tahay inaad ka fakarto **ka hor intaadan iska qorin** caymiska caafimaadka ilkaha ee carruurta.**

## 1 Sideen ayaan ku helayaa gunooyinka caafimaadka ilkaha ilmaha?

- Qof kasta wuu heli karaa gunooyinka caafimaadka ilkaha carruurta, asagoo ku helaayo midkood Qualified Health Plan (QHP), ama uu ka helo caymiska caafimaadka ilkaha carruurta oo kaligii taagan.<sup>1</sup>
- Haddii labadaba dadka waawayn iyo carruurta ka tirsan qoysku ay wada doonayaa caymis, waxaad helaysaa dookha caymiska ilkaha ee qoyska, asagoo qayb ka ah QHP ama ah caymiska caafimaadka ilkaha qoyska oo keligiis taagan.<sup>2</sup>

## 2 Waa meeqa qiimaha caymiska caafimaadka ilkaha ee Carruurta?

- Marka lagu daro lacagta bil kasta lagaa qaadaayo, caymiska caafimaadka ilkaha ee carruurta wuxuu kaa qaadi karaa lacag sanad kasta lagaa jaraayo, taasoo ah cadadka ay qasabka tahay inaad bixiso ka hor intaan caymiskaagu daboolin adeegyada aan ahayn gunooyinka ka hortaga xanuunka. Lacagaha lagaa jaraayo way kala duwan yihiin caymis kasta.
- Caymiska caafimaadka ilkaha ee carruurta wuxuu sidoo kale kaa qaadi karaa qayb ka mid ah qarashka ama qayb ka mid ah qarashka caymiska ee adeegyada la bixinaayo.
- Dhammaan caymisyada caafimaadka ilkaha ee carruurta waxay leeyihiin xadi u cayiman qarashka ugu badan ood jeebkaaga ka dhiibayso kaasoo ah \$350 cunugiiba halka uu yahay \$700 qoyskiiba. Lacagtaan waa cadadka ugu badan ee aad dhiibayso inta lagu jiro sanadka caymiska.

<sup>1</sup> Caymisyada caafimaadka ilkaha carruurta way kala duwan yihiin degmo kasta.

<sup>2</sup> Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan gunooyinka caafimaadka qoyska, ka fiiri *Xaashida Xogta ee NY State of Health Family Dental Coverage (Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee Qoyska)*.

## 3 Waa maxay adeegyada caymiska caafimaadka ilkaha ee carruurta bixiyaa?

- Gunooyinka caymiska carruurta wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo waawayn: adeegga ka hortaga ah/aasaasiga ah, midka joogtada ah, midka wayn, iyo qurxinta ilkaha ee caafimaad ahaan muhiimka ah.
- Daryeelka ilkaha ee degdega ah ayuu sidoo kale bixiyaa caymisyada caafimaadka ilkaha ee carruurta.

Qaybta Adeegga	Tusaalaha Adeegga
Ka hortagga/Aasaasiga ah	Baaritaanada, nadiifinta, daawada fluoride iyo xajinta ilkaha
Daryeel joogto ah	Baaritaanada, raajooyinka, buuxinada fudud iyo bixinta ilkaha
Daryeelka wayn	Qaliinka afka, galinta ilkaha, buuxinta ilkaha, adkaynta, iyo bixinta miciyaha
Qurxinta ilkaha	Biraha lagu xiro ilkaha si loo adkeeyo ilkaha

- Qarashaadka jeebkaaga ka baxaaya ee la xariira adeegyadaan caafimaadka ilkuhu way kala duwanaan karaan si wayn caymis kasta.
- Ma helayaan gunooyin ama adeegyo carruurta ama mudooyinka sugitaanka ee gunooyinka carruurta.

## 4 Sidee ayaan ku heli karaa caymiska caafimaadka ilkaha ee carruurta oo ku haboon cunugayga?

- NYSOH Dental Plan Comparison Tool (Aalada Isbarbardhiga Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee NYSOH) ayaa kuu sahlaya inaad is barbardhigto qarashaadka iyo faa'iidooyinka caymisyada kala duwan ee caafimaadka ilkaha carruurta.<sup>3</sup> Waxaad ka heli kartaa barta Suuqa oo ah: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/resource/dental-plan-comparison-tool>
- Webseetka Suuqu wuxuu sidoo kale leeyahay NYS Provider & Health Plan Look Up Tool (Aalada Laga Raadsho Adeeg Bixiyaasha iyo Caymiska Caafimaadka ee NYS), taasoo kutusin doonta liiska dhakhaatiirta ilkaha ee ku jira caymis kasta. Waxaad ka heli kartaa barta: <https://pndslookup.health.ny.gov/>

<sup>3</sup> Markaad baarayso caymisyada caafimaadka ilkaha, xaqiiji inaad eegto xogta gunada aad ka helayso caafimaadka ilkaha ilmaha, aadana eegayn caymisyada caafimaadka ilkaha ee qoyska ee ay ku jiraan xogta gunada dadka waawayn helayaan.

Si usted habla un idioma diferente al inglés, los servicios de asistencia de idioma están disponibles gratis para usted. Llame al 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220).

如果您使用的語言不是英語，您可以使用我們的免費語言支援服務。請致電 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)